



Summad : _____
Ref : _____

Taariikh : / /
Date : / /

Ku: Xog-hayaha Guud ee Hay'adda PSAWEN

Garoowe

Cismaan Abshir Muuse

Ujeedo: Warbixinta Shaqadii JPLG ee Degamda Jariiban & Bali-busle

Mudane Xog-haye,

Waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa wax-qabadka safarkii degamada Jariiban ee ku saabsanaa qorshaha maamul daadejinta (UN-JPLG) adeeg bixinta degmada Jariiban, ee Gobolka Mudug.

Safarka waxaa nagu weheliyey kooxda (UNICEF-JPLG) iyo maamulka degmada Jariiban, waxaana qabsoomay sida hoos ku qoran.

Degamda Jariiban

Degmada Jariiban, waa degmada ugu balaaran degmooyinka Puntland, magaalada waxaa ku yaala 2 ceel oo dawladii dhexe ee Somalia qoday sanadii 1985, taas oo lagu qoday dhaqaale dawlada Saudi bixisay, isla markaana Dawladii Jarmalku fulisay.

Ceelashaas waxaa gacanta ku haya shaqsiyaadkii dawladu uga dhacday, kuwaas oo ka shaqayn jiray wakaaladii horumarinta biyaha Somalia, hadaba si loo helo nidaam ka hana qaada degmada, waxaan muhiim noqotay in lagu qanciyo inay nidaamka cusub la jaan-qaadaan.

Kadib waxaan la kulnay maamulka degamada Jariiban si looga wada-xaajoodo nidaamka maamul baahinta ee degmada ka higelaya, kulan dheer ka dib, waxaa laysla qaatay in howsha midaynta bulshada iyo iyo dadka ceelasha ganacanta ku haya laga wada shaqeeyo.

Intaa ka dib waxaan shirar gaar gaar ah la yeelnay, masuuliyiinta ceelasha gacanta ku haya, dood dheer ka dib waxaan isla qaadanay, inay ogolaadaan nidaamkan cusub ee adeeg bixinta.

Hadaba degmada Jariiban waxaa ilaa hada qabsoomay.....

- Waaxaa shirar wada-tashi bulsho ah, loo qabtay dhamaan qaybaha kala duwan bulshada reer jariiban sida Maamulka Degamda, Odayaasha, Ganacsatada, Dhalin yarda, Haweenka, Dadka Gacanta ku haya Ceelashi dawlada ka dhacday, dhamaantoodna waxaa lagu heshiiyey, in nidaamka maamul daadajinta ay diyaar u yihiin inay ka qayb galaan, sidoo kalena waxaa la kala saxiixday go'aamadii shirka ka soo baxay.
- Waxaa qabsoomay, kulmo gaar ah oo lala qaatay ganacsatada deegaanka, si loogu dhiiri galiyo inay maalkooda, maskaxdooda, iyo muruqooda u huraan hirgalinta nidaamka maamulka biyaha degamada, si ay uga qayb qaataan shirkad la dhisi doono, taas oo ay wadaagaan ganacsatada iyo dawlada, waana laysku raacay, dhamaan ganacsatadu waa soo dhoweeyeen, isla markaana waxaa la xulay, gudi ku meel gaar ah, oo loo xilsaaray abaabulka ganacsatada.
- Waxaana loo balamay in inta dhiman shaqada la dhamaystiro, mudo labo asbuuc ah ka dib, sababtoo ah safar deg deg ah baa ku yimi mayor degmada.

Deegaanka Bali Busle

Magaalada Bali Busle, waxay leedahay 3 ceel, waxaana gacanta ku haya dad shaqsiyaad ah, magaalada waxaa ka jira shirkad private ah oo biyo galinta magaalada wax badan ka qabatay, sida dadka deegaanku ku warbixiyeen, waxay magaalada biyo galisay wax ka badan 80%, waloow ay haystaan caqabado ay ka mid yihiin, in dadka ceelasha gacanta ku haya markay doonaan biyaha magaalada ka jarayaan, waxa ay ku wadashaqeyaan uu yahay qaab kiro ah, oo shirkaddu ceelasha waxay ka kiraystaa dadka gacanta ku haya

Wax qabsoomay

- Kulankii bulshada, waxaa ka soo baxay, in odayaasha dhaqanku ogolaadeen inay ceelasha ay hayaan ay ku wareejiyaan maamulka degmada iyo PSAWEN.
- Waxay kalo oo codsadeen, in shirkada hada jirta ay u baahan tahay in dadka deegaanka qaybo kale oo ka mid ah lagu daro, si bulshadu isaga dhex aragto.
- Kulankii lala qaatay, dadka ceelasha gacanta ku haya, waxaa laysla qaatay, in diyaar u yihiin in maamulka ceelasha ay wareejiyaan, sida odayaasha deegaanku soo jeedinyeenba, si waafaqsan soo jeedinta wax-garadka deegaanka.
- Waxaa layku raacay, in mudo labo asbuuc ah kadib, la dhamaystiro inta shaqada dhiman, maamdaama mayorka degmada safar deg deg ah ku yimi.

Caqabadaha aanu la kulnay

- Dadka ceelasha gacanta ku haya, waxay ceelsha hayeen mudo u dhaxaysa 30 – 57 sano, taas oo in ay gabi ahaan wareejiyaan ceelasha adkaysay.
- Odayaasha dhaqanka oo laftigoodu, waxay mudo dheer dawr maamul ku lahaayeen, maamulka iyo talada ceelasha, nidaamka cusubna waxay mararka qaar u arki karayaan in ay luminayaan dawrkii ay ku lahaan jireen maamulka goobaha biyaha.

Talo soo Jeedin

- In ay muhiim tahay in PSAWEN la timaado, qorshe lagu xalinayo ceelashii dawlada ee shaqsiyaad gaar ah haystaan, kuwaas marba marka ka dambeeya xal koodu sii fogaanayo guud ahaan deegaanada Puntlan.
- Waxaan noo muuqday, in ceelashu soo saaraan dhaqaale wanaagsan, hadana aysan bixin khidmada PSAWEN, taas u baahan in dawladu qorshe ka diyaarsato, si dakhliga kor loogu qaado.
- In Kulamo wacyi galin ah loo qabto dadka ceelasha gacanta ku haya

Mahadsanid